Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 5-aad
Documentiga Ka/5-aad, Kul/14-aad **0 4/12/2014**

Kal. 5-aad
kul. 14-aad.saac.11:25gh.
Guntinta (Qouram) 191Xildh
Ajendaha

1. **Furitaanka Aayadaha Quranka Kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Akhrinta iyo kadoodista Mooshinka kalsooni kala noqoshada Xukuumadda.**

Shir-Guddoonka, Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane Mxamed sheikh Cusmaan Jawaari,

waxaa lagu furey Aayadaha Quraanka kariimka ah uuna akriyey Xildhibaan Ibraahin Saalax Deyfullah.

Guddoomiyaha wuxuu sheegay in ay saakay soo gaartay arin naxdin leh waxaana dhaawacmay Xildhibaan Golaha katirsan Mudane Mayoow, waxaana ku dhintay Xilshibaan hore Xil. Liibaan C/llaahi Alle haunaxariisto.

Guddoomiyaha wuxuu sheegay in uu Golaha u soo gudbinaayo kadoodista Mooshinka lana akhrinaayo Xildhibaanada saxiixay, in lasugo waafaqsanaata Dastuurka, in lailaaliyo nidaamka, kadoodista waxay dhaceysaa manta oo khamiis ah hadey dhamaan weyso sabtida bishu ay tahay 6/12/2014ka.

Guddoomiyaha wuxuu sheegay in tirada laga rabo oo ah kala noqoshada Xukuumada 139 oo kooram.
in Xildhibaanka warqad lasiiyo waa inuu isqoraa waxaana lagu ridaayaa sanduuqa qofkii is qori waayo maanta mala aqbili doono dib u qoris.

Kadib Guddoomiyaha wuxuu u yeeray mid ka mid ah Xildhibaanadii saxiixay mooshinka kalsooni kala noqoshada R/wasaaraha Mudane Cabdi wali Sheekh Axmed Xil. Axmed Cabdulle Ruush

Kadib Xil. Cusmaan Xaaji Cali wuxuu seken gareeyay Xil. Ruush.

Guddoomiyaha wuxuu u yeeray Xildhibaanada kasoo horjeeda mooshinka oo ka mid ah

Xildh. Sii sii, salaam kadib,wuxuu sheegay iney joogi jireyn ayagoo aan joogin M/weyne iyo R/wasaare. Waqtigaan maha in la horkeeno mooshin. Inkastoo mooshinkaan lagu keenay qaab soo boodo ah. Dastuurkana wuxuu sheegayaa qod. 100-aad in lala xisaabtami karo Madaxmeynaha iyo R/wasaaraha.

Xildh. Maxamed Xayr Ibraahin, wuxuu sheegay in la ogyahay mas'uuliyadda saran Xildhibaanada wuxuuna balanqaday in la sugaayo amaanka dalka, wuxuu soo jeediyay in Ra'iisulwasaaraha iyo Xukuumaddiisa aysan waxba wadi Karin wuxuuna kusoo gunaanaday in Xukuumadda kalsoonida lagala noqdo.

Xildh. Maxamed Axmed Kulan, wuxuu sheegay in mooshinka uu yahay waxba kama jiraan maadaama aan loo yeerin R/wasaaraha oo waxba la weydiinin,wuxuu kaloo sheegay in arinkaan aan waxba laga weydiinin Wasiirada.

Xildhibaanada kala ah **Ubax Tahliil, Ali Yuusuf (cali ganey**) waxay sheegeyn in Xukuumadda kalsoonida lagala noqdo,

Xildh. Bashiir Caddow Calasow wuxuu sheegay In uu mooshinkan uusan xalaal ahayn, wuxuuna soo jeediyay in mar labaad kalsoonida la siiyo.

Xildh**. Maryan Cariif Qaasim**, waxay sheektay sida qilaaka loo xaliyo waxaana loo baahan yahay in xisbi xoog leh ay soo doortaan R/wasaare iyo in Dastuurka lagu cadeeyo in uusan M/weyne keeni Karin R/wasaare

Xildh. Cabbdiqafaar Maxamud wuxuu sheegay in uu jiro xildhibaan la xiray oona lagu xiray nabad-sugidda wuxuuna usoo jeediyay in Xildhibaankaas xiran uu la mid yahay Xildhibaanada dhan oo la xiray. In qod. 100-aad wuxuu sheegayaa in uu awood u leeyahay R/wasaaraha inuu xilka ka qaadikaro Wasiir ama uu magacaabi karo.

Xil.Maxamed Shuuriye, wuxuu sheegay in ay arinkaan ay xalin karaan Xildhibaanada, wuxuu kaloo sheegay in qilaafkan uusan ahayd mid fashil kaliya ah ee uu soo bilaawday habeenkii Xukuumadda la magacaabaayay, wuxuuna soo jeediyay in R/wasaaraha kalsoonida lagala noqdo.

Xildh. Cadirishiis Xidig wuxuu sheegay in mooshinka uu soo maray proses dheer sida sharciga ah, sababta mooshinkana wuu cad yahay wuxuuna u baahan yahay mas'uulidnimo iyo wada shaqayn, Baarlamaaka waa inuu ka qaataa go'aanka rasmiga ah oo si Dastuuri ah loo xaliyo

Guddoomiyaha wuxuu sheegay in loo baxo salad iyo qado layskuna soo noqdo

Intaa kadib Guddoomiyaha wuxuu sheegay inuu kalfahiga 5-aad kulankiisa 14-aad qeybtiisa 2-aad uu furan yahay saac.ay tahay 02:05daqiiqo.

Xildh. Tahliil Cabdi wuxuu sheegay in mooshinka uu yahay sharci, R/wasaarahana uu gudan waayay waajibaadkiisa, wuxuuna soo jeediyay in xukuumadda kalsoonida lagala noqdo oo cod lagu kala baxo.

Xildh. Bashaar Ugaas wuxuu sheegay in arinta mooshinka uusan sharci ahayn wuxuuna soo jeediyay in R/wasaaraha kalsoonida la siiyo.

Guddoomiyaha Golaha wuxuu sheegey in 03:30gd. Ay biririf qaadandoonaan Xildhibaanadda kadibna dib laysku soo noqondoono.

Xildh. Maxamed Sheekh Aadan Hiiraale, wuxuu sheegay in loo baahan yahay caddaalad iyo nidaam, wuxuuna intaa ku daray in uu mooshinka sharci ahayn.

Xildh. Cabdicasiis, wuxuu sheegay in mooshinka uusan xalaal ahayn ama uusan sharci ahayn, mudane Guddoomiye ma loo saxiixi karaa xildhibaan aan wadanka joogin xeer=hoosaadkeenana maqabaa, waa in naloo sheegaa xalufada uu leeyahay R/wasaaraha.

Xildh. Faarax Cawad wuxuu sheegay in mooshinka uusan ahayn mid sharci ah R/wasaaraha waxa lagu eedeeyay ma aha mid sax ah.

Xildh. Cusmaan Xaaji Cali wuxuu sheegay in mooshinka uu yahay mid sax ah, wuxuuna ku eedeeyay R/wasaaraha in howlihii loo igmaday uusan qaban, wuxuuna soo jeediyay in kalsoonida laga noqdo Xukuumadda,

Xildh. C/qaadir Xanafi, wuxuu sheegay in mooshinka uu yahay mid xalaal ah, R/wasaarha C/wali wuxuu jabiyay Qod. 49-aad ee Dastuurka ayaa ku filan qodobadaas in xilka laga qaado R/wasaaraha.

Xildh. Ciise Maxamed Guraase , wuxuu sheegay in mooshinka uu yahay mid aan sharci ahayn, waxaana marqaati ka ah in Xukuumadda wax qabad badan ay sameysay shacabka iyo beesha caalamkana way na dhageysanayaan, Xildhibaanada Golaha wuxuu u soo jeediyay in kalsoonida la siiyo R/wasaaraha iyo xukuumaddiisa.

Xildh. Jaamac Axmed wuxuu sheegay in moooshinkan uusan sharci ahayn xukuumadda wax qabad ayay sameesay, wuxuu soo jeediyay in xaqa la ilaaliyo.

Xildh. C/fataax Nuur Mataan wuxuu sheegay in mooshinkan uu yahay sharci daro, wali wuxuu sheegay in uu ku taagan yahay, awoodda M/weynaha iyo R/wasaaraha waxayna ku caddahay Dastuurka.

Xildh. Daahir Amiin Jeesow, wuxuu sheegay in mooshinka uu yahay mid sax ah waxaana ku filan Qod.49-aad ee Dasatuurka uu R/wasaaraha jabiyay.

Xildh. Maxamed Isaaq Faarax, wuxuu sheegay in Qod, 75-aad ee xeer-hoosaadka Golaha Shacabka in uu ku qoron yahay kalsooni siinta iyo kalsooni kala noqoshada Xukuumadda

Qod. 9-aad Far,e ee Dastuurka wuxuu sheegayaa in M/weynaha uu xilka ka qaadi karo R/wasaaraha markii uu soo jeediyo.

Xildh. Ibraahin suleymaan:, wuxuu sheegay in mooshinkaan uu yahay sharci daro wuxuu ka codsaday Guddoomiyaha in uu fiiriyo Qod, 49-aad ama uu akhriyo .

Xildh. Shariif Maxamed Cabdule , wuxuu sheegay in mooshinka uu yahay sharci ayna cadahay mas'uuliyiinta awoodahooda.

Xildh. Maxamed Cabdulle Geesey wuxuu sheegay in mooshinkan uusan sharci ahayn Qod.49-aas ee Dastuurka ayay ku cadahay waxaana ku xadgudbay mas'uuliyiinta sar sare waana la ogyahay mooshinka meesha uu ku bilowday.

Xildh. Mahad Maxamed Salaad,wuxuu sheegay in Qod. 114-aad ee Dastuurka uu yahay in ay Xildhibaanada ay Gutaan waajibaadkooda Dastuuriga ah iyo in Qod.9-aad Far.e ee Dastuurka uu yahay in R/wasaaraha xilka laga qaadikaro ama uu magacaabi karo.

Xildh. Cabdibarre Yuusuf Jibriil, wuxuu sheegay in mooshinka uu yahay sharci daro tan kale wuxuu soo jeediyay in la dhooro Qod.69-aad ee Dastuurka.

Xildh.C/fataax Nuur Mataan ,wuxuu sheegey in ay yaqaaniin qaabka uu Motionkaan R/Wasaaraha ku yimid oo ahaa isku shaandheyn qaar ka mid ah Golahiisa Wasiiradiisa,uuna xaq u lahaa in uu sameeyo isku shaadheyntooda .wuxuu kaloo sheegey in marayaan marwalba arinka ah ha la iiga bedelo R/Wasaaarahaan,taasna wuxuu ku sheegey in ay tahay mid khalad ah,waana motion ka dhexdhashay Madax-weynaha .

Xildh. Faarax Cawad ,wuxuu sheegay in Motionkaan uu ku yimid wado qaldan ,R/wasaarahana hal qodob oo lagu haysto malaha.

Xildh.Cusmaan Xaaji Cali,wuxuu sheegey in Motionkaan uu sax yahay uuna xalaal yahay .

Xildh.Cabdiqaadir Xanafi:wuxuu sheegay in motionkaan yahay xalaal kuna taaganyahay sharciga Dastuurka. R/W wuxuu sitoos ah u jabiayay Qod.219aad ee dastuurka .

Xil.Daahir Amiin Jeesow: wuxuu sheegay In dastuurka yahay ku meelgaar R/w Uu tixgeliyo Dastuurka uuna la sameeyo Golahiisa Wadatashi badan.wuxuu kale uu sheegay in wasiirada ay kala jabeen xildhibaanada ma ahan in arintaas ku fiirsadaan sida ay tahay.

Xil.Maxamed Isaaq Fanax:wuxuu sheegay in qod 75aad ee Xeer-Hoosaadka Goalaha Shacabka uu ku qoran yahay kalsoonisiinta iyo kala nqoashada Xukuumadda iyo Qod.90aad ee Faqradiisa (e) ee Dastuurka ee sheegeysa in madaxweynaha uu xilka ka qaadi karo R/w marka uu soo jeediyo.

Xil.Ibraahim Suleymaan Xaaji:wuxuu sheegay in Motion uu sharci daro yahay wuxuuna codsaday in diblooceliyo,wuxuu kale uu ku daray in muuqaalka motionka ay ku jiraan dad maqan.

Xil Shariif Maxamed Cabdalla;wuxuu sheegay in motionka uu yahay sharci wuuxuu sheegay in ay cadahay Masuu;iyiinta Awoodahooda.

Xil.Maxamed Cabdulle Faarax (Geesey):wuxuu sheegay in motionka uusan sharci ahayn,wuxuu kale uu sheegay in Qod.49aad ee dastuurka ay ku xadgudbeen masuuliyiinta sare.

Intaa kadib,Guddoomiyaha wuxuu sheegay in ay is qoreen Xildhibaano gaaraaya 83 xildhibaan,ay hadleen 50 xildhibaan,soona hareen ilaa 33 xildhibaan,wuxuu sheegay im maalinta xigta laga sii wadi doono dooda halka ay joogto.

Kalfadhiga 5-aad Kul.14-aad uu shirguddoominayay Guddoomyaha Golaha Shacabka mudane Maxamed sh. Cusmaan Jawaari,wuxuu sheegay in uu shirka xiran yahay saacada marka ay ahayd 04:30gd.